Qodobka 4aad

Gargaar qareenimo

Dawladdu waxay xaqiiqsanaysaa in ay gargaar Qareenimo u yeesho ciddii soo warsata ee sabool ah.

Qodobka 5aad

Oggolaanshada gargaarka Qareenimada

1. Arjiga lagu dalbanayo gargaarka Qareenimada waxaa lagu ha-gaajinayaa Guddi ka dhisan Gobollada oo idil hadba qofka dalbanaya Gobolka uu joogo, wuxuuna ka kooban yahay Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka, Wakiilka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Rafcaanka iyo Qof ka Wakiil ah Xafiiska Siyaasadda M.G.S.K. ee meeshaas.

2. Guddigu go'aankiisu waa mid aan laga doodi karin; Haddii cid loo oggolaadana, qarajka dacwadda iyo Qareenkaba waxay dusha ka saaran yihiin Dawladda.

XUBNAHA GARSOORAYAASHA

Qodobka 6aad

Xubnaha Garsooridda ee Maxkamadaha

Maxkamadaha caadiga ah waxaa maamulkooda iska leh xubnaha soo socda:

1. Maxkamadaha Degmooyinka;
2. Maxkamadaha Gobollada;
3. Maxkamadaha Rafcaanada;
4. Maxkamadda Sare.

Xubnaha Garsoorayaasha waxay mar walba u dhisan yihiin si wadajir ah iyagoo ay ku jiraan Garsoorayaasha Dadweynaha.

Qodobka 7aad

Awoodda iyo habka

1. Awoodda iyo habka ay u dhisan yihiin xubnaha Maxkamadaha aan caadiga ahayn iyo kuwa ka gaar ah waxaa maamula Xeerar quseeya xubnahaas.

2. Awoodda iyo habka xubnaha Maxkamadaha caadiga ah waxaa maamula Xeerarka Habka Madaniga ah iyo Ciqaabta iyo inta uu dhi-gaayo Xeerkaani.

3. Awoodda Maxkamadda Sare ee ku saabsan Maadooyinka Madaniga ah iyo Ciqaabta waxaa maamula haddii aan lagu darin Xeerarka quseeya, Xeerka L. 80 ee soo baxay bishii Dishembar 6dii 1972dii.

Xukun kasta oo ka dhammaaday xubnaha Maxkamadaha caadiga ah, waxaa mar walba soo dhex geli kara Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka sida uu qabo sharciga Lambarkiisu yahay 9 ee bishii maarso 14dii 1974ta.

4. Doodaha laga qabo Qaraarada dhammaaday ee Dawladda waa in la ogeysiiyaa Maamulka soo saaray qaraarkaas ilaa mudda ku siman 30 Maalmood oo laga billaabo maalinta qaraarka la ogeysiiyey dhinaca ama si caddaan ah u sugnaatay in uu qaraarka ogaadey.

30 maalmood dhexdood ay ka billaabato waqtigaa kore, doodda waa in la geeya Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda Sare. Dacwadda Idaariga ah waxaa lagu qaadayaa Maxkamadda Sare horteeda iyadoo loo fiirinayo sida uu qabo Xeerka habka Madaniga. Markii Xukunka la dhigo, Kaaliyaha Maxkamadda Sare wuxuu ogeysiiyayaa Qofkii doodda qabay is-goo isla markaas koobi u diraya maamulkii ay danaysey.

Qodobka 8aad

Maxkamadda Degmada

1. Maxkamadda Degmada waxay ku taal Magaalamadaxda Degma kasta waxayna awooddeeda Maxkamadeed ku idil yahay inta Degmadu ka kooban tahay.

2. Maxkamadda Degmada waxay hawlaheeda Maxkamadeed ku qaadi kartaa meel kasta oo ka mid ah Degmada.

3. Maxkamadda Degmadu waxay iska leedahay Laba laamood Laanta Madaniga ah iyo Laanta Ciqaabta, mid waliba waxay ka kooban tahay hal Garsoore ee Dawladda iyo Laba Garsoore ee Dadweynaha.

Laanta Madaniga ah waxay awooddeedu tahay dacwadaha Madaniga ah oo Qiimahooda dhaafsiisnayn 3000 Shilin taaso aynan ku jirin dacwadaha Shaqada.

Laanta Madaniga ah waxay weliba awood ahaan u leedahay dacwadaha ku saabsan (Axwaalu Shakhsiya), iyada oo aan lagu xirin qiimahooda inta uu gaarsiisan yahay.

Laanta Ciqaabta waxay awooddeedu tahay dembiyada ku xeer Xeerka Ciqaabta oo Ciqaabtooda Xariga ahi dhaafsiisnayn Saddex (3) Sano; Ciqaabta Ganaaxa ahna dhaafsiisnayn 3000 Shilin, kaligood ama wada-jirkooda.

Qodobka 9aad

Maxkamadda Gobolka

1. Maxkamadda Gobolku waxay ku taal Magaala Madaxda Gobol kasta waxayna awooddeeda Maxkamadeed ku idishahay inta uu Gobolku ka kooban yahay.

2. Maxkamadda Gobolka waxay Hawlaheeda Maxkamadeed ku qaban kartaa meel kasta oo ka mid ah Gobolka.

3. Maxkamadda Gobolka waxay ka kooban tahay Saddex Laamood oo kala ah:

Laanta Caadiga ah, laanta tashiga (Assise), iyo laanta shaqada; Mid waliba waxay ka kooban tahay hal Garsoore ee Dawladda iyo Laba Garsoore ee Dadweynaha.

Laanta Caadiga ah waxay awooddeedu tahay:

b) Dhinaca Madaniga, wixii dacwad ah oo aan awooddeeda lahayn Maxkamadda Degmada ama laanta Shaqada.

t) Dhinaca Ciqaabta, wixii dembiya ah oo aan awooddeeda lahayn Maxkamadda Degmada ama laanta tashiga (Assise) ama xubnaha aan caadiga ahayn ama gaar ka ah.

Laanta tashiga (Assise) waxay awooddeedu tahay, dembiyada Ciqaabtoodu tahay Dilka, Xabsi daa-inka ama xarigga aan ka hooseyn ugu yaraantiisa 10 Sano, aan markaana awooddeeda lahayn xubnaha Maxkamadaha aan Caadiga ahayn ama gaarka ah.

Laanta Shaqada waxay awooddeedu tahay dacwadaha ku saabsan shaqada oo leh qiime kasta.

Qodobka 10aad

Maxkamadda Rafcaanka

1. Maxkamadda Rafcaanka waxay ku taalaa magaala madaxda Gobol kasta waxayna awooddeeda Maxkamadeed ku idishahay inta uu

Gobolku ka kooban yahay.

2. Maxkamadda Rafcaanka waxay hawlaheeda Maxkamadeed ku qaban kartaa meel kasto'oo ka mid ah Gobolka.

3. Maxkamadda Rafcaanka waxay leedahay laba laamood: Laanta caadiga ah iyo Laanta tashiga (Assise) ee Racfaanka.

Laanta Caadiga ah waxay ka kooban tahay hal Garsoore ee Dowladda iyo laba Garsoore ee Dadweynaha. Laanta Tashiga (Assise) waxay ka kooban tahay hal Garsoore ee Dowladda iyo Afar Garsoore ee Dadweynaha.

Laanta Caadiga ah waxay awoodeedu tahay Racfaanada laga soo qaato dacwadaha iyo ciqaabta lidna ku ah go'aanada ka soo baxay Maxkamadda Degmada iyo Laanta Caadiga ah ee Maxkamadda Gobolka.

Laanta Tashiga (Assise) ee Racfaanka waxay awoodeeda tahay Racfaanada laga qaato go'aanada ka soo baxa laanta tashiga (Assise) ee Maxkamadda Gobolka.

4. Maxkamadda Rafcaanka waxay awood keli ahaan ah u leedahay dhamaynta iyo aqoonsiga Xukunnada Ajnabiga ah.

Qodobka 11aad

Hawlaha uu leeyahay Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka

Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka waxaa weeye Sarkaalka Gobolka ugu sarreeya dhinaca hawlaha Garsooridda; wuxuuna ku leeyahay inta ku simana gobolka kormeer idaari ah iyo wadid ku saabsan:

- Hawlaha Xubnaha Maxkamadaha caadiga ah,
- Hawlaha Waacidiinta iyo Arrimaha Awqafta,
- Xabsiyada iyo dhaqaalaynta Maxaabiista.

Maxkamadda Rafcaanka waxaa kale ee loo xilsaaray dhamaynta isqabadka awoodda ee ka dhashay Maxkamadaha degmooyinka ee ku yaal gobolka ama iyaga iyo Maxkamadda Gobolka ee Gobolkaas.

Qodobka 12aad

Awooda Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka

Inta ku siman Gobolka wuxuu Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka awood uu u leeyahay in uu:

- Dacwad uu u kala beddelo Maxkamad Degmo iyo Maxkamad Degmo oo kale iyadoo ay u sabab tahay nabad gelyada, nidaamka ama caafimaadka guud.
- Garsoore ka wareejiyo dacwad marka uu garsooraha ka istaago dacwadda iyada ahi ama cid dacwadda dhinac ka ahi ka cabato.

- Oggolaado in garsoorayaasha u amba baxaan meel ka baxsan saldhiga Xafiiskooda hawl awgeed.
- Bixiyo fasaxyo aan caadi ahayn markii ay jirto sababo deg-deg ah oo waafi ah.

Qodobka 13aad

Maxkamadda Sare

1. Maxkamadda Sare waxay ku taal magaala madaxda Dalka waxayna awooddeedu ku idishahay inta uu dhulka Jamhuuriyadda uu ka kooban yahay.

Maxkamadda Sare waxay ka kooban tahay: hal Guddoomiye, hal Guddoomiye ku Xigeen, Sagaal la Taliyayaal iyo 4 Garsoore Dadweyne.

Maxkamadda Sare, waxay hawlaheeda Maxkamadeed ku qaban kartaa meel kastoo ka mid ah dhulka Jamhuuriyadda markii sidaa ay gudboonaato ama ay jirto sabab dhaqaaleed ama sabab kale oo waafi ah.

2. Maxkamadda Sare waxay dacwadaha u gashaa mar ay laanteeda loo dhan yahay waxaana ka qayb gala guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Laba Garsoore ee Dawladda iyo 4 Afar Garsoore ee Dadweynaha iyo mar laanteedu tahay caadi waxaana ka qayb gelaya hal Garsoore ee Dawladda ee Guddoomiye ka ah laba Garsoore Dawladda iyo laba Garsoore ee Dadweynaha. Gelitaanka dacwadaha iyadoo loo dhan yahay ama ayadoo si caadi ah lugu galo waxaa goosta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare markii uu arko muhimadda arrinta go'aanka laga gaaraayo leedahay.

3. Maxkamadda Sare waxay xaqiiqsanaysa in si hagaagsan loo dhawrayo iyo si toosan loo hirgelinayo Sharciga waxayna kor meerid ku leedahay Hawlaha Xafiisyada Xeer Ilaaliyaha Guud waxayna guda-naysaa hawl kasta ee sharcigu u banaynayo.

SI GOONI AH WAXAY AWOODDEEDU TAHAY:

- b) Doodaha laga gabo go'aannada lagu gaarey heerka Rafcaanka ama hal heer oo kali ah oo ka soo baxay xubnaha Maxkamadda Caadiga ah.
- t) Doodaha laga keeno go'aannada dhammaaday ee maamulka Guud ee Dawladda.
- j) Doodaha ku noqoshada u baahan (revisione) iyo ka noqoshada go'aaneed (revocazione) ee Maxkamadda.
- x) Doodaha laga keeno Qaraarada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.
- kh) Isku qabashada soohdimaha dacwadaha lagu galo iyo awoodda ee ka yimaada xubnaha kala geddisan ee Maxkamadda Caadiga ah, kuwa aan Caadiga ahayn ama gaarka ah iyadoo laga reebay inta uu qabo Qod. 11aad Xubintiisa dambe ee Sharciga.

XUBNAHA DOODDA AMA OOGGA DACWADAHA

Qodobka 14aad

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

1. Xafiiska dhexe ee Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu ku yaalaa Magaala Madaxda Dalka wuxuuna ka kooban yahay Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Ku-Xigeennadiisa. Ku-Xigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Xamar waxaa weeye (10) toban.

2. Waxaa Maxkamad kasta ee Rafcaanka jooga hal Ku-xigeen Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuuna Gobolkaas Wakiil uga yahay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud xagga Maxkamadda Rafcaanka, Maxkamadda Gobolka iyo Maxkamadaha Degmooyinka ee Gobolkaas.

Qodobka 15aad

Hawlaha uu leeyahay Xeer Ilaaliyaha Guud iyo

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

1. Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu qaabishan yahay dhaqdhaqaaqinta Ciqaabta wuxuuna ku adeegayaa awaamirta Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, si loo xannaaneeyo dhawridda Xeerka dhinaca Maadooyinka Madaniga ah iyo Idaariga ah.

Xeer Ilaaliyaha Guud waa Madaxa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, Ku-xigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud ee uu ka kooban yahay Xafiiskuna waxay ku adeegayaan iyagoo isaga Wakiil ka ah.

2. Xeer Ilaaliyaha Guud:

- b) Isaga ama isagoo ku adeeganaya Ku-xigeennadiisa ama Saraakiil iyo Kormeerayaal Boliska ka tirsan oo Sharciga u oggolaaday, wuxuu socodsiinayaa dhaqaaqinta Ciqaabta wuxuuna ka qayb gelayaa doodaha Maxkamadaha.
- t) Mararka uu Sharcigu oggolyahay wuxuu socodsiinayaa dhaqaaqinta Dacwadaha Madaniga ah, wuxuuna ka qayb gelayaa doodaha madaniga ah isagoo ku xannaanaynaya danaha Carruurta Agoonta ah iyo kuwa da'doodu yar tahay.
- j) Wuxuu Racfaan ka qaadanayaa Xukunnada Ciqaabta ah iyo kuwa Madaniga ah isagoo fiirinaayo danta Sharciga.
- x) Wuxuu warsanayaa soo dhexgelidda Maxkamada Sare isagoo codsanayaa in ay soo saarto go'aan Maxkamadeed mararka ay sidaa habboonaato si loo hirgeliyo inta uu qabo xubinta kowaad ee qodobkaan.
- kh) Wuxuu hogaaminayaa hawlaha ku saabsan hubinta iyo ka hortagidda gelidda dembiyada ay qabtaan ciidamada Booliska.

- d) Wuxuu baarayaa meelaha lagu xareeyo maxaabiista isagoo taam mas'uuliyadeeda saaran tahay ayuu xaqiiqsanayaa in la dhawrayo nidaamka iyo ujeedooyinka meelaha maxaabiista lugu xareeyo iyo fulinta ciqaabtooda.

Qodobka 16aad

Awoodda Xeer Ilaaliyaha Guud iyo ku Xigeenadiisa

Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu la wareego baarid dacwo iyo hawl kastoo ee ka horaysa doodaha dacwadaha iyo gudbinta eedaynta ee ku saabsan dhaqaajinta ciqaabta ee laga bilaabay meel kastoo ee ka mid ah dalka Jamhuuriyadda isagoo markaas qabanaya doodda eedda Maxkamadaha ku awood leh horteeda.

Awooddaa oo kale waxaa leh ku Xigeenadda Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Rafcaanka jooga inta ku siman Gobolkooda.

Qodobka 17aad

Awoodda uu Xeer Ilaaliyaha Guud ku leeyahay

Booliska dembiyada-baara

Boliiska dembiyada baara waxay ka hoos shaqaynayaan Xeer ilaaliyaha Guud. Sidaas awgeed Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu shaqada ka joojiyo ama ka dheereeyo ama ka istaajiyo Boliiska dembiyada baara ee isaga mas'uuliyaddiisa ku hoos adeegayo.

Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud ma laha awooddaa oo kale, hase yeeshe waxay u soo jeedinayaan Xeer Ilaaliyaha Guud mararka ay la tahay in ay habboon tahay in la qaado tilaabooyinka kor ku qoran oo kale iyo cidda lugu qaadayo.

SHAQAALAHGA GARSOORKA

Qodobka 18aad

Nidaamka Garsoorka

1. Nidaamka Garsoorka wuxuu ka dhisan yahay Garsoorayaal dacwadaha gala, iyo Garsoorayaal dacwadaha soo ooga oo ah xubnaha Maxkamadaha caadiga ah.

2. Waxaa lugu qaadayaa qawaaniinta u dejisan nidaamka Garsoorka cid kastoo aan si joogta ahayn ugu shaqaysa hawsha garsooridda inkastoo aysan ka mid ahayn nidaamka garsoorka.

3. Kaaliyayaasha iyo Gaarsiyayaasha garsoorka waxay yihiin gargaarayaasha nidaamka garsoorka.

Qodobka 19aad

Shaqaalaha Garsoorka iyo Xaaladood sharci ahaan

1. Xaaladda sharci ahaaneed (Stato giuridico) ee garsoorayaasha iyo gargaarayaasha nidaamka garsoorka waxaa maamula nidaamka shaqaalaha dowladda ee lagu kaamilyay inta uu qabo sharcigaan.

2. Dhinaca kala saraynta idaariga ah, garsoorayaal iyo gargaarayaalba waxay ka tirsan yihiin shaqaalaha Wasaaradda Garsoorka iyo arrimaha Diinta iyagoo kala leh qaybahan soo socda:

- | | | |
|-----------------|----------|------------------------|
| b) Garsoorayaal | Qaybta A | ee shaqaalaha dawladda |
| t) Kaaliyayaal | Qaybta B | ee shaqaalaha dawladda |
| j) Garsiyayaal | Qaybta C | ee shaqaalaha dawladda |

3. Darajooyinka, shaqada la qabto iyo xubnaha shaqaalaha garsoorka ee lugu muujiyay jadwalka ay diyaarisay Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta oo ku lifaaqan sharcigaan waxay la mid yihiin darajooyinka iyo shaqada la qabto ee shaqaalaha dawladda.

Qodobka 20aad

Dhaarta

1. Garsoorayaasha dawladda iyo gargaarayaasha nidaamka garsoorka, inta aynan hawlarasmi ahaan u bilaabin, waxay marayaan *Dhaar*, oo lugu marayo qaabka hoos ku dhigan:

«Waxaan ku dhaaranayaa in aan si daacad ah u fulinayo sharciga dowladda iyo in aan gudanayo wajibaadka iga saaran hawshayda iyo xafiikayga iyadoo lagu daryeelayo danta cadaaladda iyo xanaannadda mabaadi'da ku xusan xaashidii koowaad iyo tii labaad ee kacaanka».

2. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare wuxuu dhaartiisa ku marayaa Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka hortiisa.

— Garsoorayaasha kale waxay dhaartooda ku marayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa.

3. Gargaarayaasha nidaamka Garsoorka waxay dhaartooda ku marayaan madaxa Xafiiska Maxkamadda hortiisa.

GARSOORKA

Qodobka 21aad

Darajooyinka iyo hawlaha la qabto

Darajooyinka iyo hawlaha Garsooridda waxay yihiin:

- | | |
|---------------------------------|-----|
| b) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare | A1 |
| t) La taliyaha koowaad | A2 |
| j) La taliye | A3) |
| | A4) |

- x) Garsooraha Maxkamadda Gobolka A5
- kh) Ku-xigeenka Garsooraha Maxkamadda Gobolka A6
- d) Garsooraha Maxkamadda Degmada A7
- r) Ku-Xigeenka Garsooraha Maxkamadda Degmada A8
- s) Dhegeyste (Uditore) A9

Garsoorayaasha Dawladda waxaa lagu magacaabi karaa Xafiis kasta oo ka mid ah kuwa Garsooridda iyada oo aan loo fiirin derejada ay joo-gaan iyadoo marna ahayn shardi in lagu kasbado darajada u dhiganta Xafiiska lagu magacaabay.

Markii ay jirto baahi deg-deg ah hawl qabasho awgeed, xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta wuxuu samaynayaa magacaabid ku meel gaar ah isagoo dhegeystey Guddoomiyaha Maxka-madda Sare.

Qodobka 22aad

Soo Gelitaanka Garsoorka

1. Garsoorayaasha Dawladda waxaa lagu magacaabaa Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka kaddib markii ay soo maraan tartan caam ah.

2. Tartanka lagu soo gelayo Garsooridda waxaa soo ban dhiga Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta markii uu oggolaado Gud-doomiyaha G.S.K. Tartanka waxaa lagu caddeynayaa hababka looga soo qayb gelayo iyo ku Guulaysashadiisa.

3. Guddoomiyaha G.S.K. kaddib markii uu sida u soo jeediyo Xo-ghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta wuxuu si gooni ahaan ah ugu magacaabi karaa darajo iyo nidaam kasta ee Gar-sooridda Qofkii qaba shahaado Jaamicadeed ee Sharciga waaya aragni-mana u leh xagga Qawaaniinta oo si habsami ah uga soo bixi kara haw-laha Garsoorka.

Qodobka 23aad

Dhegeysiga (Uditorato)

1. Inta ku guuleysata tartanka waxaa Dekreeto uu soo saaro Ma-daxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka loogu magacaabayaa dhegeysta-yaasha Garsoorka (Uditori) oo hubis ku jira.

2. Muddada dhegeysiga hubiska ah waxaa weeye hal sano, inta ay muddadaasi socoto dhegeystayaashu waxay iska leeyihiin Xannaano dha-qaaleed ee darajada billawga ah ee shaqada.

3. Muddadaas markii ay idlaato, dhegeystayaasha loo aqoonsaday in ay muteysteen waxaa lagu qaadanayaa markii la helo ra'iga Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta Hawsha ah ku-xigeenka Garsooraha Maxkamadda Degmada iyagoo haysanaya darajo-dooda billawga ah ee shaqada.

4 .Muddada dhegeysiga waxaa la sii kordhin karaa ilaa muddo hal sano oo kale si ay dhegeystayaashu u helaan tabar hawleed oo aad u sii fiican.

Dhegeystayaasha markii ay muddadaas kor dhinta ah dhamaato aan weli istahilin in la qaato, shaqada waa laga saarayaa,

Qodobka 24aad

Magacaabid aan caadi ahayn

Iyadoo ay dhaafsiisan tahay Xeerarka horeeyey, Guddoomiyaha G.S.K. Wuxuu dekreetadiisa ku magacaabayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud.

Hawlahaa waxaa lagu magacaabi karaa Garsoorayaasha, Barayaasha Jaamicadda ka dhiga Maadooyinka Sharciga, Garyaqaannada iyo waaya aragyaal sharciga heer sare ka gaarey.

Qodobka 25aad

Dallacaad

1. Dallacaadda Garsoorayaashu waxay ku imaanaysaa ku kala horeynta soo gelitaanka Shaqada, muteysi iyo Intixaan iyadoo la eegayo xubnaha ka bannaan darajada Sare.

2. Looma dallacin karo daraja sare, Garsoorayaasha aan shaqada haynin ugu yaraantii Saddex Sanadood ee shaqa rasmi ah qabsi ah,

3. Si kasta ha ahaate Dallacaaddu waxay ku xiran tahay ra'iga uu ka qabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo ra'yiga oggolaanshada ah Xoghayahay Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

4. Dallacaadda waxaa lagu samaynayaa Dekreetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 26aad

Badbaadinta Garsooridda (Guarentigie giudiziarie)

1. Xeerku wuxuu xaqiiqsanayaa badbaadinta Garsoorayaasha marka ay gudanayaan Hawlahooda Garsooriga ah, hawlahaa lama reebi karo lamana joojin karo haddii aysan jirin sabab ku Tacaluqda Asluubta, wixii ka baxsan hawlahaas Garsoorayaasha waa in ay dhawraan Xeerarka lagu maamulo Shaqooyinka Shaqaalaha Dawladda.

2. Garsoorayaasha lama xiri karo, lama reebi karo Xuriyaddooda Shakhsiga ah lagumana qaadi karo dacwado Ciqaab ah iyadoo sidaa uusan oggolaanin Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta.

Haddii Garsooraha lagu qabto isagoo dembi Faraha kula jira, oggolaanshada Xoghayaha Dawladda looma baahna, hase yeeshee waa in si deg-deg loo soo gaarsiiyaa Xoghayaha qabashada Garsoorahaas.

3. Garsoorayaasha looguma yeeri karo dacwado Madani ah wixii ku saabsan hawlaha ay qabteen intii ay gudnayeen Shaqadooda haddii aysan ahayn mar ay dembi galeen.

Qodobka 27aad

Ka reebid

Garsoorayaasha ma qaban karaan hawla ama shaqooyin ka soo horjeeda Hawlahoda. Si gaar ahaaneed ma qaban karaan shaqo qareenimo, waana in ay ka istaagaan hawlo ganacsi ah. Waxay ka qayb qaadan karaan Guddiyada dhexdhexaadinta haddii ay qabaan oggolaanashada qoran ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

XUBNAHA BAARISTA XAFIISKA KOR MEERIDDA

Qodobka 28aad

Xafiiska kormeeridda

Baarista ku saabsan shaqaynta Xafiisyada Garsooridda waxaa qabta Xafiiska kor meeridda.

Xafiiskaa wuxuu ka kooban yahay:

- Hal Garsoore ee ka tirsan Maxkamadda Sare ee uu magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
- Hal Garsoore oo darajadiisu aynan ka hooseynin A4 ee uu magacaabo Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta.
- Agaasimaha Waaxda Garsoorka iyo Xirfadda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta.

Hoggaanka Xafiiskaas waxaa iska leh Garsooraha uu magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, hawshiisana wuxuu wadi karaa ilaa muddo ku siman Hal sano oo aan la cusboonayn karin.

Xoghayaha Xafiiskaa waxaa noqonaya Garsooraha uu magacaabay Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta, mudada hawshiisana waxaa weeye ilaa hal Sano.

Qodobka 29aad

Waajibaadka Xafiiska kor meeridda

Xafiiska kormeeridda waxay awooddiisu tahay in uu:

- Baarid furo ama uu qabto kormeerid iyo fatashaad lagu baarayo Shaqaynta iyo socodsiinta Xafiisyaasha Garsooridda.
- Soo jeediyo go'aanno la xiriira Asluubta ee lagu fulinayo Garsoorayaasha ilaan xad ah in laga joojiyo ama laga saaro shaqada.

- Tala ka bixis saldhigyada Maxkamadaha, kordhinta iyo dhi-midda xubnaha shaqada iyo beddelaada Garsoorayaasha si uu Gacan ugu geysto shaqaynta fiican ee Xafiisyada.
- Qabto hawl kasta oo kormeerid ah ama baarid lagu samaynayo shaqooyinka Garsooridda.

Qodobka 30aad

Awoodda iyo ikhtisaaska Xafiiska kormeeridda

Xafiiska Kormeeridda wuxuu hawshiisa qabanayaa markii ay sidaa soo weydiiyaan Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta ama Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu ikhtisaas uu kali u yahay u qabaa Maadooyinka loo xilsaaray.

Sidaas awgeed, wixii codsasha ah, ama dacwa ah ama cabasha ah oo lagu soo hagaajiyo Xafiisya kale, waa in loo soo gudbiyaa Xafiiska kormeeridda oo markaa hawshiisa qabsanaya isagoo markii uu ka dhiibto ra'yigiisa oo isku duba ridan u diraya war bixin qoran Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta.

Qodobka 31aad

Awoodda Xoghayaha Dawladda

Awoodda kama dambeynta ah ee lagu fulinayo Nidaamka Garsooriga ah iyo Gargaarayaashiisa waxaa iska leh Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta markii uu dhegeysto ra'yiga Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

Wixii go'aanna ah ee ka soo baxa waxaa loo soo saarayaa sida uu qabo Qod. 33aad ee Sharcigan.

XEERARKA KALA GEDDISAN

Qodobka 32aad

Sanadka Garsoorka

1. Sanadka Garsoorka wuxuu bilaabanayaa maalmaha hore ee bisha Jannayo.
2. Furitaanka sanadka Garsoorka waxaa lugu qabanayaa magaala madaxda Dalka.
3. Sanadka Garsoorka wuxuu yeelan doonaa joojin hal bil ah oo ah 1da ilaa 31da bisha Dishambar, muddadaane xafiisyada waxay u furnaan doonaan oo keliya wixii hawlo oo deg-deg ah.
4. Fasaxa Caadiga ah ee Garsoorayaasha iyo gargaarayaasha waxaa la bixinyaa muddadaa shaqada joogsatay oo keliya.
5. Madaxda xafiisyada waa in ay mar kastaba xaqiiqsadaan fulinta in ay arrimaha ku xusan xubinta seddexaad ee qodobkan.

Qodobka 33aad

Go'aano ku saabsan nidaamka Garsoorka

1. Go'aanada (qaraarada) idaariga ah ama asluubta ku saabsan waxaa lagu soo saarayaa:

- b) Dekreetada Madaxweynaha G. S. K., haddii ay yihiin garsoorayaal;
- t) Dekreetada Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo arrimaha Diinta haddii ay yihiin kaaliyayaal ama gaarisiyayaalka garsoorka.

2. Fasaxa caadiga ah iyo kan aan caadiga ahayn waxaa garsoorayaasha iyo Kaaliyayaasha iyo Gaarsiiyayaalka garsoorka siinaya Madaxwaynaha Maxkamadda Sare ama guddoomiyayaasha Maxkamadaha Rafcaanka inta ku siman Gobolkooda, markii uu guddoomiyaha Maxkamadda Sare uu wakiisho.

3. Markii ay baahi awgeed u dhacdo in uu guddoomiyaha Maxkamadda Sare si aan joogta ahayn u maqnaado, waxaa sii beddelaya Ku Xigeenka Maxkamadda Sare; Garsoorayaasha dacwadaha gala iyo gar-gaarayaasha waxaa iyagana beddeli kara garsoorayaal kale iyo gar-gaarayaal ay isku darajo yihiin ama leh darajo ka duwan taasoo amarkeeda bixiyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama guddoomiyayaasha Maxkamadaha Rafcaanka inta ku siman Gobolkooda haddii uu guddoomiyaha Maxkamadda Sare wakiisho.

4. Markii ay baahi awgeed ay dhacdo in uu Xeer Ilaaliyaha Guud si aan joogta ahayn u maqnaado, waxaa sii beddelaya Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud oo shaqada ugu duqsan oo ka mid ah Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud oo jooga Maxkamadda Rafcaanka, Gobolka iyo Degmooyinka waxaa lagu dhaqayaa sida uu qabo qodobka 12aad ee xeerka habka ciqaabta markii ay baahi awgeed u dhacdo in ay maqnaadaan ama aynan joogin ba.

Qodobka 34aad

Baabi'inta, wax ka beddelidda iyo assasida Xafiisyadda Garsoorka

1. Asaasida iyo baabi'inta xafiisyada Garsoorka waxaa lagu soo saarayaa Dekreetada Madaxwaynaha Golaha Sare ee Kacaanka markii uu sida soo jeediyo Xoghayaha Dowladda ee wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

2. Wax ka beddelidda Xafiisyada horey u dhisnaa waxaa lagu soo saarayaa Dekreetada Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

XEERARKA U DAMBEEYA

Qodobka 35aad

Naqlin

Waxaa la naqlinayaa Nidaamka Garsoorka Dekreetada Iambakeedu yahay 3 ee bishii Juunyo 12dii 1962 dii iyo intii xigtay oo wax laga beddelay oo ka soo horjeeda nidaamkan iyadoo aynan ku jirin wixii nidaamkan uu reebtay.

Qodobka 36aad

U Dirid

Intii nidaamkan uusan caddaynin ee ku saabsan xaaladda shaqaalaha nidaamka garsoorka, waxaa lagu dhaqayaa Nidaamka Shaqaalaha Dowladda.

Qodobka 37aad

Dhaqan gelidda

Nidaamkan wuxuu dhaqan geleyaa 21ka Oktoobar, 1974 ta.

Muqdisho, 22 Seteembar, 1974.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

XOGHAYAHA DOWLADDA

ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta

Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen

XUBNAHA SHAQADA EE GARSOORAYAASHA IYO
GAR-GAARAYAASHA
NIDAAMKA GARSOORKA

Kaalinta Garsoorayaasha (baahida Tobanka sano ee soo socdo)

Darajooyinka Siman	Hawsha ama Maamulka	Tirada Jagooyinka
A1	Guddoom. Maxkamadda Sare	1
A2 Agaasimaha Guud	Ku xigeenka Guddoomihaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud	2
A3 Agaasimaha Waaxda	Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka iyo la taliyayaasha Maxkamadda Sare	30
A4 La taliye	La taliyayaasha Maxkamadda Rafcaanka iyo Ku Xigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Max- kamadda Rafcaanka	30
A5 Madaxa Xubinta shaqada	Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka (Garsoore Maxk. G.)	15
A6 Saraakiisha Hogaaminta	Garsoore (dacwo galaha) Max- kamadda Gobolka iyo Ku Xi- geennada Xeer Ilaaliyaha G. ee Maxk. G. (waa Ku Xigeen Garsoore Maxk. Gobolka).	23
A7 Madaxa Laanta	Guddoomiyaha Maxk. Degmada (garsoore Maxk. degmo)	115
A8 Saraakiil	Garsoore (dacwo gale) iyo ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha G. ee Maxkamadda Degmada	115
A9 Saraakiil	Dhageystayaal (uditori)	

KAALINTA KAALIYAYAASHA

Darajoinka Siman	Hawsha ama Maamulka	Tirada Jagooyinka
B6	Kaaliyaha Sare	17
B7	Kaaliyayaasha Koowaad	27
B8	Kaaliyayaal	60
B9	Kaaliye ku Xigeeno	60
B10	Kalkaaliyaha Kaaliyaha	66

KAALINTA GAARSIIYAYAASHA GARSOORKA

Darajoinka Siman	Hawsha ama Maamulka	Tirada Jagooyinka
C 8	Gaarsiyayaasha Garsoorka Sare	16
C 9	Gaarsiyayaasha Garsoorka	77
C10	Ku Xigeenada Gaarsiyayaasha Gars.	77